# Gaadiidka dugsiga oo ah mid ammaan ah qiimihisuna jaban yahay

Maarso 14, 2023 Weydiimaha saxaafadda

Dowlada Alberta waxa ay maalgashanaysaa gaadiidka si arday badani ay awood ugu yeeshaan raacista basaska, ardayda miyiga ka yimaadaana safarkooda loo yareeyo qoysaskana ay lacag ugu baaqato.

Iyadoo laga jawaabayo ra’yiga waalidiinta, maamulka dugsiyada iyo kuwa kale, dawladu waxa ay bixinaysaa taageerooyin si ay u yarayso safarka miyiga lagaga imanayo, cadaadiska dhaqaale ee sicir bararka iyo qiimaha kordhaya ee ku dul dhacaya waalidiinta.

Ayada oo la adeegsanayo Miisaaniyada 2023, maamullada dugsiyadu waxa uu heli doonaan $414 milyan oo dheeri ah saddexda sanno ee soo socda si loo taageero horumarinaha gaadiidka dugsiga loogana dhigo waxbarashada mid ay heli karaan qarashkeedana goyn karaan qoysaska reer Alberta.

## U baaajinta qoysaska lacag

Marka la meelmariyo isbedellada sharciyeed, ku dhawaad 80,000 oo arday dheeraad ah ayaa u qalmi doonta maalgalinta gaadiidka ee gobolka. Waxaa ka qayb ah ku dhawaad 47,000 oo arday kuwaasoo hadda bixinaya lacag si ay u isticmaalaan adeegyada basaska kuwanoo uqalmi doona taageerada gobolka, taasoo waalidiinta u baajin doonta lacag ka badan $20 milyan.

## Masaafada loogu qalmayo oo la yareeyay

Hadda, si ay ardaydu ugu qalmaan adeegyada basaska ee dawladu maalgaliso, waa inay ku nool yihiin ugu yaraan meel u jirta 2.4 kiilomitir dugsigooda loo cayimay. Laga bilaabo Sibtambar 1, 2024, Dawlada Alberta waxay masaafadan ugu soo yaraynaysaa ardayda Fasalada 1 illaa 6 hal kiilomitir ardayda Fasalada 7 illaa 12-na laba kiilomitir, ayadoo laga cabbirayo wadddada ugu gaaban ee lasoo mari karo. Iyadoo la adeegsanayo maalgalinaha Miisaaniyadda 2023, maamulada dugsiyada ee doonaya inay hirgaliyaan isbedelladaan sannad dugsiyeedka 2023-24 waa ay hirgalin karaan.

Marka la yareeyo masaafada uqalmidda, ku dhawaad 33,000 oo arday ayaa awood u yeelan doona inay isticmaalaan basaska dugsiga si ay dugsiga si ammaan ah ugu yimaadaan. Ku dhawaad 20,000

oo ardaydan kamid ah waxay awood u yeelan doonaan inay isticmaalaan bas horey u adeegaayay oo aan buuxin, gaar ahaan goobaha miyiga ah. Ku dhawaad 250 basas waddooyin dheeraad ah ayaa loo baahan doona si loogu adeego 13,000 ee arday ee hadhay ee ku nool goobaha miyiga iyo magaalada.

## Maaraynta cadaadisyada dhanka qarashka iyo sicir bararka

Marka laga yimaado taageerista ardayda uqalma ee cusub, Miisaniyadda 2023 ee maalgalinaysa gaadiidka ardayda waxa ay sii wadi doontaa inay maarayso cadaadisyada dhanka qarashka iyo sicir bararka ee ay soo waajahayaan maamulada dugsiyada iyo qandaraaslayda baslayaasha. Marka la maalgaliyo 100 waddo oo dheeraad ah oo basasku marayaan si ay ugu adeegaan ardayda miyiga, wakhtiga lagaga soo safraayo miyiga waxaa la filayaa inuu hoos usoo dhaco sagaal boqolkiiba. Kordhinta maalgalinta tababarka dareewalada waxa uu taageeri doonaa 1,250 dareewal, kuwanoo ay ka mid yihiin 350 dareewal oo cusub, waxaana ay kordhin doonaan shaqaalaha dareewaliinta ah lix boqolkiiba.

Dawlada Alberta waxa ay sidoo kale sii wadi doontaa Fuel Price Contigency Program(Barnaamijka La socoshada Qiimaha Shidaalka) sannad dugsiyeedka 2023-24. Barnaamijku waxa uu siiyaa maamulada dugsiyada maalgalin dheeraad ah si ay ula tacaalaan qarashka shidaalka ee aadka u sarreeya loona ilaaliyo adeegyada basaska ee dugsiga. Illaa taariikhda maanta, barnaamijkku waxa uu u baajiyay maamulada dugsiyada $8.5 milyan sannad dugsiyeedkii 2021-22 (Maarso illaa Juun 2022), $16.5 milyan sannad dugsiyeedkii 2022-23, waxaana la filayaa inuu u baajiyo sannadka lacag dhan $23.5 milyan sannad dugsiyeedka 2023-24.

## Guddi Hawleedka Shaqaalaha Gaadiidka Ardayda

Maalglinta gaadiidka ardayda waa ay kordhaysaa isbedellada dhanka uqalmiddana waxa ay ku xidhan tahay Guddi Hawleedka Shaqaalaha Gaadiidka Ardayda. Guddidan oo la abuuray Maajo, 2020, guddi hawleedku waxa uu isku keenay nidaamka waxbarasho, mattalayaasha shirkadaha gaadiidka iyo MLAs si ay u qaadaa dhigaan mustaqbalka gaadiidka ardayda ee Alberta. Warbixintooda waxaa lasii daayay Maajo, 2021, iyadoo uu la socday qorshe hawleedka saddexda waji leh ee dawlada iyagoo ka jawabaya talooyinkii lasoo jeediyay. Maalgalinta iyo cusboonaysiinaha u qalmitaanka ee lagu dhawaaqay iyagoo qayb ka ah Miisaaniyadda 2023 waxa ay hirgalinayaan wajjigii saddexaad uguna dambeeyay ee qorshe hawleedkaasi.

Miisaaniyadda 2023 waxa ay u ilaalinaysaa mustaqbalka Alberta iyadoo isbedello ku samaynaysa daryeelka caafimaad si loo buuxiyo baahiyaha dadka, looga taageero reer Alberta qarashka maciishadda kor u kacaya, ku ilaalinta bulshadeena ammaan iyo kobcinta dhaqaalaha iyadoo lasoo

kordhinayo shaqooyin dheeraad ah, waxbarasho tayo leh iyo sii wadista kala iskudhafnaanta bulshada.

## Xaqiiqooyinka kooban

- Miisaaniyadda 2023, maalgalinta gaadiidka ardayda waxa ay kordhi doontaa $414 milyan saddexda sanno ee soo socda, tanoo ay ka mid tahay $93.5 milyan sannadka 2023-24, $160 milyan sannadka 2024-25 iyo $160 milyan sannadka 2025-26.
- Wakhti xaadirkan, maamulada dugsiyadu waxay gaadiid siiyaan in ka badan 300,000, ama ku dhawaad 42 boqolkiiba, ardayda Alberta.
    - Ku dhawaad 253,000 oo ah ardayda ree Alberta kuwaas oo la geeyo lagana soo qaado dugsiga maalin kasta ayaa u qalma adeegyada gaadiidka ee uu gobolku maalgaliyo.
    - Guddiyada dugsigu waxay sidoo kale siiyaan adeegyada gaadiidka in ka badan 47,000 arday kuwaasoo aan qalmin, iyagoo lacag ka qaadaya.
- Hannanaka maalgelinta gaadiidka ardaydu wuxuu maalgalin ku siisaa maamulada dugsiyada arday kasta oo u qalma.
- Si waafaqsan *Education Act (Xeerka Waxbarashada),* maamulada dugsiyada ee gaarka ah iyo kuwa luuqada faransiiska wax lagu dhigo ayaa sharci ahaan ay waajib ku tahay inay siiyaan gaadiid ardayda geeya kana soo qaada dugsiga haddii ardaydu ay daggan yihiin hareeraha waaxda dugsiga, goobta tagitaanka dugsiga buuxiyaana shuruudaha sharcigu dajiyay.
- Sharciga Gaadiidka ee Dugsiga ayaa u dajiya shuruudaha cidda ay waajibka ku tahay inay u adeegaan maamulada dugsiyadu.
- Barnaamijka Fuel Price Contingency waxaa dib loo bilaabay xagaagii 2022 si loo siiyo maamulada dugsiyada damaanad dhanka qarashka kacaya ah marka qiimaha diesel-ku kor udhaafo $1.25 litirkiiba.

## Warbaahinta kala duwan

- Daawo warar saxaafadeedyada

## Weydiimaha saxaafadeed

### Emily Peckham

587-985-4305
Xoghayaha Saxaafada, Waxbarashada